WASAARADDA WAXBARASHADA IYO TACLIINTA SARE

IMTIXAANKA FASALKA 8AAD. 2018

# AF SOOMAALI

2018

XAFIISKA IMTIXAANAADKA PUNTLAND

SomEXams

SOM EXAMS

# WASAARADDA WAXBARASHADA IYO TACLIINTA SARE
# XAFIISKA IMTIXAANAADKA PUNTLAND

Code Number

**Imtixaanka Fasalka 8aad 2018**
**Amin 2 Saac iyo 10 Daqiiqo Akhris ah**

# AF-SOOMAALI

## TILMAAMAHA IMTIXAANKA

- Waxaa imtixaanku ka kooban yahay 7 bog
- Tiri bogagga, hadday wax ka maqan yihiin u sheeg ilaaliyaha imtixaanka
- Haku qorin magacaaga iyo Roll lambarkaaga toona warqadda imtixaanka
- Hubi in waraaqda lifaaqu ku dhegen tahay imtixaanka, hadday kaa maqan tahay u sheeg ilaaliyaha imtixaanka.
- Lama ogola waraaqo dheeraad ah
- Jawaabtu hadday kaa qaldanto isku tallaab saar, kadibna qor tan saxda ah.

**Imtixaanku wuxuu ka kooban yahay:**

| QAYBTA | DHIBCAHA | QAYBTA | DHIBCAHA |
|---|---|---|---|
| Qaybta 1aad | 25 dhibcood | Qaybta 5aad | 20 dhibcood |
| Qaybta 2aad | 20 dhibcood | Qaybta 6aad | 10 dhibcood |
| Qaybta 3aad | 10 dhibcood | | |
| Qaybta 4aad | 15 dhibcood | | |
| | | | **Wadarta: 100 Dhibcood** |

## Waxaa iska leh saxaha

| QAYBAHA | DHIBCO | QAYBAHA | DHIBCO |
|---|---|---|---|
| QAYBTA 1AAD | | QAYBTA 5AAD | |
| QAYBTA 2AAD | | QAYBTA 6AAD | |
| QAYBTA 3AAD | | | |
| QAYBTA 4AAD | | | |
| WADAR | | | % |


• www.somexams.com ✳ info@somexams.com © incooperation with www.qalinqaad.com

SOM EXAMS



***Akhri sheekadan kana warceli su'aalaha ka dambeeya***

Waagii hore dadku waxay iskula hadli jireen hadallo **dollogan**,oo sida loo yiri iyo sida ujeedaddoodu tahay aysan is lahayn abwaanimada ku duugan awgeed . Farriimaha iyo dhambaalada ay isku wargelin jireena.Waxaa dhacdey in wiil aabbahiis la heshiin waayey oo **abaabulka** reerka iyo **aqoosha aduunyada** ka dhexeysey ay isku jiireen,iyadoo ay ku wacneyd Odeyga oo nin kulul oo hawl kar ah ahaa iyo wiilkoo aan danneyn jirin **meesinka** la raaciyo iyo masuuliyada reerka uu ku leeyahay. Odeygii waxuu go'aansadey in aaney wadda noolaan Karin wiilkan, waxuu siiyey **jiscin** waxuuna ku yiri:**" Maandhow haddaad ila heshiin weydey iga tag."**Markaas buu wiilkii ka tegay odeygii.



Saadkii aabbahii soo siiyey wax yar buu magaalada kala soo galey,labo todobaan ka dibna waa ka dhammaadey.Wiilkii inkastuu faro marnaa ,oo habeenno baahi ku seexan jirey,haddana oogadiisa iyo hugiisa midna **uskag** uma ogoleyn. Maxaa yeeley waxaa uu xusuusnaa maahmaahda ah ***"Arrad waa dan Uskagna waa doqonimo".*** Odeygii waxuu maqley in wiilkiisii magaalada aad iyo aad ugu silicsan yahay,wax gargaareyna aaney jirin,markaasuu waa **beer wax dhalaye,** safaro magaalada u baxayey fariin u soo farey oo ku yiri:"Jaalayaalow wiilkaygii igu salaama ,waxuu yahayna iiga soo warama".



Nimankii safaraddu wiilkii fariintii bay u sheegeen.Goortaas buu ku yiri: Aabbahay waxaad ku tiraahdaa wiilkaagii waxuu kuu soo farey ***("shanta salaadooda isku weesuu ku tukadaa").***Nimanku ma aysan fahmin oraahda wiilka oo micnaheedu ahaa ***maalintii hal mar baan wax dhadhamiyaa.*** Markii safarkii soo laabtey ayaa odeygii loo sheegey fariintii wiilka isla markiina wuu fahmey aad buuna uga murugoodey dayaca iyo darxumada wiilkiisa haysta . Ayaamo ka dib ayuu safaradii oo magaaladii ku laabanaya waxuu ugu sii dhiibey **Qumbe subag ah iyo kiish ay ku jiraan soddon xabbo oo hilib shiilan ah** waxuuna ku yiri:" igu salaama wiilkeygii waxaadna ku tiraahdaa**" bishu waa sodon balliguna waa buuxaa",** nimankii intii ay jidka ku sii jireen bay qumbihii subaga ahaa raashin ku **iidaanteen** , hilibkiina kow iyo toban cad kala baxeen iyadoo is leh la garan mayo.Goortey magaaladii soo galeen bay wiilkii u geeyeen baaqigii fariintiina u tebiyeen.

Nasiib wanaag wiilku waxuu ahaa nin **xigmad badan oo abwaanimada aabbahiisa ka raacey** isla markiiba wuu fahmey in alaabtu aaney dhammayn, waxuuna ku yiri aabbahay igu salaama una sheega **xagayaga" bishu waa sagaal iyo toban balliguna waa kala bar"**Odeygii wuu ogaadey iney nimanku **tuugo** yihiin waana dacweeyey xaqiisiina ka qaatey.Wiilkiina aabbahiis buu fariin u soo dirsadey isagoo leh "Aabbe **lama huraan waa cawska jiilaale"** waan soo laaban, odeygiina waa uu yeeley.


©PNEB,2018

• www.somexams.com ✻ info@somexams.com © incooperation with www.qalinqaad.com

**QAYBTII 1AAD** **25 DHIBCOOD**

**B: Goobo geli xarafka saxda ah...................08 dhibcood**

1. Waagii hore dadku waxay isku la hadli jireen:
   - B: hadallo dheer-dheer
   - T: hadallo hoose
   - J: Hadallo dhexdhexaad ah
   - X: Hadallo dellegan
2. **Dadkii waagii hore badan koodu waxay ahaayeen dad ay ku duugan tahay:**
   - B: Fulaynimo iyo dadnimo xumo
   - T: Aqoon yari iyo doqonimo
   - J: Abwaanimo iyo dadnimo
   - X: Abwaanimo iyo dul yari
3. **Wiilka iyo aabbihii waxay ku heshiin waayeen**:
   - B: Abaabulka reerka iyo aqoosha aduunyada
   - T: Talada iyo Aroorka xoolaha
   - J: wardoonka magaalo iyo soofka xoolaha
   - X:in la guuro iyo in la negaado
4. **Wiilku wuxuu ku wanaagsanaa dhanka**:
   - B: Caawinta waalidka
   - T: Nadaafadda naftiisa
   - J: Dhaqidda xoolaha
   - X: Wax maqalka waalidka
5. Ereyga "**Jiscin**" waxaa laga wadaa:
   - B: Dhar iyo dhogor
   - T: Caano iyo Ilays
   - J: Cunto iyo Biyo
   - X: Xoolo iyo Aqal
6. **Odaygii wuxuu waagii dambe maqlay in wiilkiisii magaaladii ku:**
   - B: Silicsan yahay.
   - T: Barbaaray
   - J: Dhintay
   - X: Aflaxay
7. **Odeygu waxuu wiilkiisa u sii dhiibay:**
   - B: Biyo iyo Caano
   - T: Subag iyo Hilib
   - J: Bur iyo Saliid
   - X: Subag iyo Lacag
8. **Odaygu wuxuu waagii dambe ogaaday inay nimanku yihiin**:
   - B: Niman la isku halayn karo
   - T Niman Wadaado
   - J: Niman ammaanad ilaaliya
   - X: Niman tuugo ah

**T: Ka warceli weydiimaha Hoose Dhammaantood.....06 dhibcood**

1. Odaygu jiscinka uu wiilka siiyey noloshii safarkiisa ma ku filaatey?

   .......................................................................................................................................

2. Wiilku aabbihii ma karaystay?

   .......................................................................................................................................

3. Hadduu odaygu markii hore inan ka eryey muxuu ugu soo farey fariinta?

   .......................................................................................................................................

   .......................................................................................................................................

4. Maxay nimankii safarradu sameeyeen?

   .......................................................................................................................................

   .......................................................................................................................................


©PNEB,2018
• www.somexams.com ✳ info@somexams.com © incooperation with www.qalinqaad.com

5. Sidee bay ugudambayntii, arrintii ku dhammaatay?
.................................................................................................................
.................................................................................................................

6. Maxuu wiilku uga jeedey **"Lama huraan waa cawska jiilaal**?
.................................................................................................................
.................................................................................................................

**J:Ku buuxi meelaha bannaan ereyo ku habboon: 5 dhibcood**

1. Shanta salaadood isku ......................ku tukadaa.
2. Nasiib wanaag wiilku waxuu ahaa............................
3. Arrad waa dan uskagna waa...............................
4. Odeygii waxuu ogaadey iney nimanku..................yihiin.
5. Igu Salaama waxaad ku dhehdaa "bishu waa sodon ..............

**X: Sharrax ereyadaan sheekada ku jira... 06 dhibcood**

1. Uskag : .........................................................................
2. Qumbe ..........................................................................
3. Dhambaalada ...................................................................
4. U tebiyeen .....................................................................
5. Iidaanteen......................................................................
6. Aqoosha.........................................................................

## QAYBTA 2AAD : NAXWAHA AFKA-SOOMAALIG 20 DHIBCOOD

B. **Buuxi meelaha bannaan adiga oo adeegsanaya shaxanka hoose ereyada ku jira.5 dh.**

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| *magac* | *xiriiriye* | *meeleeye* | *qodob* | *Yaab!* |

1. Waxa uu isku xiraa labo walxood oo kala madax bannaan sida: labo xaraf, laba tiro iwm.........................................................................
2. Waa astaan timaadda marka hadalka si adag loo yiraahdo
.................................................................................................................
3. Waa erey magaca gadaal ka raaca kana dhiga mid la isla garanayo.................................................................................
4. Waxaa loo bixiyaa shay ama noole, si looga garto kuwa la nooca ah..................................................................................
5. Waa erey kuu sheega meesha uu yaallo shayga aad raadinayso
.................................................................................................................

**T: ka soo saar falkaabayaasha ku jira weerahan hoose: 5x1=5 dhibcood**

1. Imaamku waxuu muxaarada u soo jeediyey si qiiro leh ( )
2. Ileysku waxuu u socdaa xawaare dheereeya ( )
3. Keyntu waxay u doogsatey si fiican ( )
4. Xaali casharka u fahmin si wanaagsan ( )
5. Dhulka u soco si xasilan ( )



©PNEB,2018

• www.somexams.com ✳ info@somexams.com © incooperation with www.qalinqaad.com

**J: Raaci Qodobadka naxwe ee ku habboon.** **( 05 dhibcood )**

1. Laamo.........
2. Wiil...............
3. Fariin...........
4. Sac..............
5. Dad............

**X: ka dhig ereyadaan hoose fal Amar...... (05 dhibcood)**

1. Cuney.......................
2. Riixey.......................
3. Qaadey....................
4. Lisay.........................
5. Kariyey.....................

**QAYBTA 3AAD: MAAHMAAYO** **10 DHIBCOOD**

**B: Sharrax kooban ka bixi ujeedadda maahmaahyadan hoose......(05 dhibcood)**

1. Af jooga looma adeego. ______
2. Sir ma qabe allaw sahan ah. ______
3. Banaankii mare maradiisa geed ma qabsado. ______
4. Hubsiimo hal baa la siistaa. ______
5. In taadan falin ka fiirso. ______

**J: Keen min hal Maahmaah oo ku saabsan Magacyada hoose....( 05 dhibcood)**

1. Dad: ______
2. Biyo: Biyo sacabadaada lagaga dhargaa
3. Dumar: Dumar iyo abeeso afkooda isku dilaan
4. Fardaha: fardahaadan lahayn Futadu kul gaabsha
5. Nin: nintii sexdaa sicii dibildhalaa

**QAYBTA 4AAD: EREY DHAQAMEEDYO IYO SARBEEBO......** **(15 DHIBCOOD)**

**B: isla doono sarbeebaha hoose iyo macnaha ku habboon:** **(05 dhibcood)**

| | |
|---|---|
| 1. Suxuladaan Subagga darsaday | Aad bay ugu badan yihiin meesha |
| 2. Afkaa ciidda loo daray | Waa geesi |
| 3. Waa shan qaboo shan siidaa | Waxba ka haysto |
| 4. Birtuu calashaday | Waa laga adkaaday |
| 5. Waa sida calaacashaas | Waa ka dhergey |


©PNEB,2018

• www.somexams.com ✳ info@somexams.com © incooperation with www.qalinqaad.com

SOM EXAMS



**T: Keen Macnaha ereyadahoose:** ( 05 dhibcood)

1. Dhacrasho: ____________________
2. Loog: ____________________
3. Madhax: ____________________
4. Dhalandhool: ____________________
5. Ciir: ____________________

**J: Isla doono ereyga iyo Lidkiisa:** **( 05 dhibcood)**

| | |
|---|---|
| 1. Irmaan | Gaaxin |
| 2. Yarad | Rakaad |
| 3. Ugub | Galoof |
| 4. Lisid | Dhibaad |
| 5. Kamiin | Curad |

**QAYBTA 5 AAD: SUUGAAN (20 DHIBCOOD)**

Gabaygaan waxaa curiyey **Cali Xuseen Xirsi** (**makaad sade**) waxa uu tiriyey markii uu socday halgankii gobonimo doonka, waxayna wada hadlayeen shimbirka layiraahdo fiinta, Cali waxa uu aad uga gubanaayey dhulkii loo yiqiinay hawd iyo dhulkii kaydka ee gumaystaha ingiriisku ku wareejiyey itoobiya.

- Fiin yahay adaa olo
  layoo oohin ciirsada e.
- Haddii aan laguu imanin waad
  aamusi lahayde.
- Maxaad aragtay waan kula
  qabaa uur kutaalada e?
- Waxay tiri ilaahay haddaad
  aad ugaranayso.
- Oo aad islaam tahay idea
  waan irdhays nahaye.
- Waxaan iri qofkii i
  abhiyaa wuu ammaan heliye.
- Ashahaadadda iyo waan
  aqaan Aayaddii ilaahe.
- Ha yeeshee ilmada kaadhacdiyo
  ummalka guud kaaga,
- In yar iiga sheeg waxaan rabaa
  inaan ogaadaaye?
- Waxay tidhi inkaar buu ku
  go`ay odaygii Soomaale.
- Awlaadii uu dhalay waa
  sida adoogoode.
- Haday ul iyo diir keed yihiin
  rag iska eegaaya.
- Afrikadaan ma joogeen
  nimaan Aabbe ku lahayne.
- Ayax kuma dhaleen kaymihii
  ubaxa weynaay



©PNEB,2018

• www.somexams.com ✳ info@somexams.com © incooperation with www.qalinqaad.com

SOM EXAMS



**B: Hoosta ka xarriq Magacyada Bisha ku jira tan ugu saxsan:.....(05 dhibcood)**

1. **Gabaygaan waxaa tiriyey abwaan**: (Cali **Jaamac**, **Cali Xuseen**,**Xaaji Aadan**)
2. **Gabaygaan noociisu waa**: (Waano, Guhaad, Fariin, Calaacal)
3. **Shimbirta abwaanku la hadlay waxay ahayd**:(Qooleey,Dhebed, Fiin, Guuguule)
4. **Ereyga uur ku taallo waxaa laga wadaa**:(Farxad, Nabar, Xiiso, Murugo)
5. **Geyiga cidda ay uga cabanayaan waa**: (Qaraabo, Tuugo, Gumaystayaal, Soomaalikale )

**T: ka warceli weydiimaha hoose dhammaantood...... (05 dhibcood)**

✓ **Sharrax kooban ka bixi tuducyadaan hoose.**

1. Awlaadii uu dhalay waa sida adoogoode.

   ________________________________________

   Haday ul iyo diir keed yihiin rag iska eegaaya

   ________________________________________

2. Afrikadaan ma joogeen nimaan Aabbe ku lahayne.

   ________________________________________

   Ayax ku ma dhaleen kaymihii ubaxa weynaaye.

   ________________________________________

3. Fiinyahay adaaololayoo oohin ciirsadey?

   ________________________________________

**J: keen Macnaha ereyada cusub ee gabayga:...............( 05 dhibcood)**

1. Umal.............................
2. Irdihii..............................
3. Uunkale...............................
4. Ayax...........................
5. Adoogood.....................

**X: Ka dooro sanduuqa ereyga macnihiisa kuna hor qor ereyga leh 5 dhib)**

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| **Hoobal** | **Jaqsiin** | **Hammiyo** | **Hilin** | **lama huraan** |

1. Fannaan .........................
2. Daw....................................
3. Lagama maarmaan..................
4. Fekero...........................
5. Nuujin..........................


©PNEB,2018
• www.somexams.com ✳ info@somexams.com © incooperation with www.qalinqaad.com

SOM EXAMS



## QAYBTA 6AAD CURIS (10 DHIBCOOD)

**Akhri wargayskaan ka dibna qor codsigaaga shaqo, kana soo qaad inaad tahay arday waxbarashadiisii dhammaystay oo shaqo doon ah, iilaali xeerarka qoraal**

Mudane: Siciid ayaa waxa uu doonayey in uu shaqo siiyo xog-haye uga shaqeeya xafiis yar. Waxaa uu ku qoray wargays xayaysiinkan soo socota.



**SHAQO BANNAAN**

Xog-heyn

Tixraaca: 12/000/2

Qof da' yar ayaa loo baahan yahay, wax khibrad ahna lagu xiri mayo

**Ugu yaraan Takhasuskiisa:**

- Waa inuu Kumputerka si fiican u yaqaan, awoodi karaa inuu isticmaalo **Word and Excel**
- Awoodda ku hadalka English waa fursad
- Waa inuu maarayn karo qaabka taleefanada

**Qoraalkaaga u gudbi:**

Maamulaha
P.O BOX 123
GAROWE

*Dhammaad.*



©PNEB,2018

• www.somexams.com ✳ info@somexams.com © incooperation with www.qalinqaad.com